



KAMID NOQOSHA, XUBINIMADA XISBIGA IYO SHURUUDAHA KU BIIRISTA XISBIGA

Waxaa ku biiri kara Xisbiga qof kasta oo muwaadin ah una dhashay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo ku nool Dalka gudahiisa ama dibadiisa,soona gudbiyay codsigiisa xubinimada Xisbiga haddii uu buuxiya shuruudaha ku qoran qodobka soosocda.

- a) in uu yahay Muslim Somaali ah.
- b) In aan da'diisu ka yareeyn 18 sano;
- c) In uu maskaxiyan u fayowyahay, ahliya dhamaystirana leeyahay, awood buuxdana u leeyahay gudashada xilkiisa xubinimo.
- d) In uu ku sifoobo toosnaan iyo akhlaaq wanaag
- e) In uu aaminsanyahay mabaadi'da Xisbiga, iyo xaqiijinta ahdaafta Xisbiga;
- f) In uu u hogaansamo xeerarka saldhiga u ah Xisbiga iyo dhammaan barnaamijyada siyaasadeed iyo xeer-hoosaadyada kale.
- g) In aanu xubin ka ahayn Xisbi siyaasadeed kale.
- h) In uu xubinimada u soo qorto arji laanta xisbiga ee ugu dhow ayna soo taskiyayso.
- i) In uu bixiyo Qaaraanka Xisbiga oo Bil kasto ah Xadiga hadba ay go'aamiyaan Golaha Fulinta ee Xisbiga.
- j) Inaan Maxkamad hore ugu xukumin danbiyada lidka ku ah jiritaanka Soomaaliya ama Khiyaano Qaran ama Dil bareer ah uu geystay.
- k) In uusan kamid aheyn Shaqaalaha Dawladda, Ciidamada Qalabka Sida, Garsoorka iyo Diblamaasiyiinta Shaqada ku jira.